

Hagaha Waalidiinta/Mas'ulka ee Warbixinta Dhibcaha ACCESS for ELLs Beddelka ah

Waa maxay Warbixinta Ardayga Shakhsiga ah?

Warbixinta Ardayga Shakhsiga ah ayaa muujinaysaa Dhibcaha ilmahaaga ee ku dul yaal Access for ELL-ka beddalka ah. Warbixintan waxa loogu talagalay qoysaska iyo tacliimiyayaasha.

ACCESS for ELLs Beddelka ah qiimaynta **xirfadda luqadda** Ingiriisiga ee loogu talagalay Heerarka fasal ee 1–12. Imtixaanka ayaa cabbiraya horumarka **luqadda Ingiriisiga** ardayda loo aqoonsaday **Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga** qabta naafanimo garaad oo wayn.

Dusha sare ee warbixinta ayay ka mid yihiin magaca ilmahaaga, taariikhda dhalashada, heerka fasalka, dugsiga iyo magaca dugsi degmadda, iyo tirooyinka aqoonsiga gobolka. Waxa ka mid ah macluumaadka la xiriira adeegyada waxbarashada gaaraka ah ee ilmahaaga.

Arday:		
Taariikhda dhalashada:	Fasalka:	Xaaladda Waxbarashada Ardayga BP:
Sumad Degmo (ID):	Sumad gobol:	
Iskuul:	Degmo:	Gobol:
Ardaygu ma qaataa qiimayn gobol oo waqtiiyo kala duwan la sameeyo?	# inta sano oo ardaygu soo maray waxbarasho Ingiriis ah:	
Naafanimada ugu Weyn:	Naafanimada Labaad (Haddii ay jirto):	

Maxay ii sheegaysaa Warbixinta Ardayga Shakhsiga ah?

Warbixinta ayaa muujinaysa siddeedii dhibcood ee ilmahaagu ka heli karo imtixaanka. Haddii u ilmahaagu qaatay dhammaan afarta qaybood ee imtixaanka, isaga/iyada ayaa heli doona dhammaan siddeedda dhibcoodba. NA ama lama hayo, ma muujiso inaan laga soo warbixin dhibco. Waxa jira afar *Aag Luqadeed* dhibco iyo afar *Dhibco Wadareed*.

Aag Luqadeedka dhibcaha ayaa lagaga warbixinayaa Dhagaysiga, Hadalka, Akhriska, iyo Qoraalka. Dhibcaha ayaa ka tarjumaya afarta qaybood ee imtixaanka.

Dhibco Wadareedka ayaa ah isku-geynta Aag Luqadeedka dhibcaha ilmahaaga. Afarta Dhibco Wadareed ayaa ah Luqadda Afka, Akhriska iyo Qorista, Fahamka, iyo Dhibcaha Guud.

Siddeed dhibcaha looga warbixiyaa?

Dhibcaha Heerka Xirfadda ayaa looga soo warbixiyaa isku jir ahaan xaraf iyo tiro, tusaale ahaan A2 ama P1. Dhibcahan ayaa waafaqaya lixda Heerarka Xirfadda Luqadda Ingiriisiga ee WIDA. Dhibicda ku bilaabanta xarafka “A” ayaa loo qaadan karaa dhibic arday bilow ah, halka “P” loo qaadan karo mid ah dhibic ka sii heer sarraysa markay tahay xirfadda Ingiriisiga. Garaafka ku yaal warbixinta ayaa hoos lagu hadheeyay si ay u metesho dhibicda Heerka Xirfadaha ilmahaaga. Dhibicda P3 ayaa kaliya lagu heli karaa Qoritaanka. Khaanadda ku taal bogga 3 ee warbixinta ayaa ka bixnaysa tusaalooyin waxa ardayada joojta heerka xirfadda ilmahaagu ay ku qabsan karaan Ingiriisiga.

Heerka Aqoonta**					
A1	A2	A3	P1	P2	(P3)
A1					

Cabirka Natijada (Waxaa suurtagal ah 910-960) iyo Cabirka Kalsoonida					
Qeexitaanada ka fiiri Hagaha Qeexaya Warbixinta Natijada					
910	920	930	940	950	960
			940		

Dhibcaha Cabbirka ayaa looga warbixiyaa tirooyin ahaan isku kala jiraa laga bilaabo 910 – 960, tusaale haan 920. Dhibcaha ayaa ka tarjumaya heerka fasal ee ilmahaaga iyo adkaanta sheyada imtixaanka u isagu/iyadu

si guul leh u dhammaystiray. Cabbirka dhibcaha ayaa waxtar kuugu leh si aad u aragto horumarka ilmahaagu ku samaynayo horumarka luqadda Ingiriisiga sannad ilaa sannad. Garaafka ku yaal warbixinta ayaa muujinaya cabbirka Dhibicda ilmahaaga ee loogu talagalay mid kasta oo siddeedda dhibcood ah, oo waliba waxay tusaysaa *Faliiqa Kalsoonida* ee loogu talagalay mid kasta oo isaga/iyada Cabbirkooda Dhibcaha ah.

Faliiqayada Kalsoonida ayaa ah aag ku hadhaysan midka kasta Dhibcaha Cabbirka ilmahaaga ah. Taasi waxay muujinaysaa baaxada suuragalka ah ee dhibicda ilmahaaga iyada oo leh saxnimo male ahaan ah 95%. Si kale haddii loo dhigo, haddii ilmahaagu u qaatay imtixaan si ku celcelin leh, waxaa jira fursad 95% ah in dhibcahooda isaga/iyada ay noqon doonto inta u dhexeysa baaxada hadhaysan.



Wuxuu ardaygu ka muujiyay qaybaha Dhagaysiga iyo Akhrinta ayaa tusaysa tirada jawaabaha saxda ah ee ilmahaagu helay iyada ya u weheliyaan taageerada heerarka kala duwan. Tusaale ahaan, Cue A (Baaqa A) micnaheedu waa ilmahaaga oo maqlay su'aasha iyada oo laba jeer loogu celiyay. Cue B micnaheedu waa iyada qaabka erayada loo dhigay ee su'aasha la fududeeyay oo markaana loogu celiyay. Cue C micnaheedu waa iyada qaabka erayada loo dhigay su'aasha ee la fududeeyay oo markaana loogu celiyay oo tilmaamaha jawaabta saxda ahna la siiyay. Taageerooyinkan ayaa ayaa loogu talagalay sidii loo qiyaasi lahaa inta afka Ingiriisiga ah ee ilmahaagu fahmo.

	# Tirada Jawaabaha Saxsan (Ilaa iyo 9)	Caawinaad Yar				Caawinaad Badan	
		Baaqid A		Baaqid B		Baaqid C	
		# Saxsan	% Inta Su'aal Saxsan	# Saxsan	% Inta Su'aal Saxsan	# Saxsan	% Inta Su'aal Saxsan
Dhagaysi	5	1	20%	3	60%	1	20%
Akhrin	3	0		1	33.3%	2	66.6%

Warbixinta Maamulka Imtixaanka ayaa lag heli karaa bogga 2 ee warbixinta dhibcaaha ilmahaaga. Sawirka midigta xiga ayaa ah tusaalaha bogga 2. Boggan warbixinta dhibcuhu ayaa bixinaya macluumaad waxtar leh oo ku saabsan meesha uu ilmahaagu ku qaatay imtixaanka (qaybta sare), iyo wixii taageero la siiyay ilmahaaga (qaybta 2aad), iyo macluumaadka ku saabsan qofka ka qaaday imtixaanka ilmahaaga (laba qaybood ee ugu dambeeya). Haddii aad qabto wax su'aalo kasta ah oo ku saabsan macluumaadka lagaga warbixiyay bogga 2, fadlan la xiriir dugsiga ilmahaaga.

Sifaynta Heerka Xirfadda ayaa laga heli karaa bogga 3 ee warbixinta dhibcaha ilmahaaga. Sifaynta waxa ay carruurta ku jirta heer kasta oo xirfad luqad samayn karaan ayaa loo bixinyaa hadalka iyo qorista (soo saaritaanka) iyo dhegaysiga iyo akhriska (qaabailaanka). Sawirka hoosta ku yaal ayaa muujinaya Sifaynta Heerka Xirfadda loogu talagalay soosaarista P3.

GALITAANKA Baddalka ah ee ELLs™
 Imtixaanka Aqoonta Luuqadda Ingiriiska ee Ardayda ELL oo Qabta Naafanimo Garaad oo Wayn

Warbixinta Ardayga ee Shaqsiya ah
 2019

Warbixinta Maamulka Imtixaanka

Meesha Imtixaanka	
Meeil aan ardayga ku cudbayn (tusaale faal uu yaqaan, xaafis ama gun)	YES
Meeil aan aylo lahayn	YES
Meeil aan wax jeediya lahayn	YES
Wada xariir ardayga iyo imtixaan qaadaha kalligood	YES

Qaybaha Imtixaanka oo tixgalinta la siiyay	
Tilmaamaha imtixaanka	YES
Qaabka loo soo bandhigay	YES
Qaabka jawaabta	YES
Qaabka Qabashada/Meesha	YES
Waqtiga la Qabashada/Samaynta Juddalka	YES
Kale	

Darajada Qofka Imtixaan-qaadaha	
Macallin waxbarashada gaarka ah	YES
ESL/Macallin Laba-luuqadile ah	
Macallin waxbarashada guud	
Aqoonyahan Habka Hadal/Luuqadeed	
Aqoonyahan Cilmi-nafsi ee Iskuulka	
Lataliye Iskuul	
Imtixaan Qaade LEA	
Kale	

Aqoonta Imtixaan-qaadaha u leeyahay kartida ardayga	
Aqoonta uu u leeyahay xaaladda IEP ee ardayga	YES
Aqoonta uu u leeyahay barnaamijka waxbarasho ee ardayga	YES
Horay tixgalino u waafajin ugu sameeyay ardayga	YES
Xiriir jira la leeyahay ardayga	YES
Aqoon yar ayaa u leeyahay ardayga	
Waxba kama oga awoodaha ardayga	

Student Name or ID
 14075-00002-1919

	Bartayaasha luuqadda Ingiriiska oo leh naafanimo garaad oo wayn waxay abuurayaan (abuuriid):	Bartayaasha luuqadda Ingiriiska oo leh naafanimo garaad oo wayn waxay qaadanayaan (qaadasho):
Horumarka Heerka P3	<ul style="list-style-type: none"> Luuqad mowduucyo gaar ah, ooy ku jiraan kuwa isku asalka ah iyo tibaaxaha Erayada iyo tibaaxaha micnayaal badan leh oo lagu isticmaalo mowduucyo kala duwan Dhismaha naxwaha soo noqnoqda oo marmar isbadbaddala Qaabka dhismaha jumlada ee mowduucyo kala duwan Jumlado gaaban oo qaar sii balaaranayaan, siina adkaanayaan Tibaaxo baahsan oo hal figrad ka hadlaya ama tibaaxo ha hadlaya figrado badan 	<p>Ardaydu waxay buundo ku keeni karaan aqoonta galitaanka badalka ah ee P3 dhanka qoraalka. Dhanka Dhagaysiga, Hadalka, iyo Akhrinta kuma jiraan imtixaanka ku aadan aqoonta heerka P3 iyo ka kor; sidaas darteed, ardayda imtixaankan galaysa ma muujin karaan heerka Ingiriiska ee aqoonta galitaanka badalka ah ee P3 iyo ka kor ee dhinacyadan.</p>

Maxaan ka eegtaa warbixinta ilmahayga?

Waxaan ku dhiirigelinaynaa qoysasku inay eegaan dhammaan dhibcaha looga warbixiyay ee ilmahooda. Waa kuwan qaar ka mid ah talooyin ku saabsan sida loo fasiro, ama loo fahmo, dhibcaha ilmahaaga:

- *Eeg dhibcaha Aagga Luqadda.* Eeg dhibcaha isaga/iyada Heerka Xirfadda Dhegaysiga, Hadalka, Akhriska iyo Qoraalka. Dhibcahee ayaa u dhow P2? Dhibcahee ayaa u dhow A1?
- *Eeg Dhibco Wadareedka.* Eeg dhibcaha isaga/iyada Heerka Xirfadda loogu talagalay Luqadda afka, Akhriska iyo Qorista, Fahamka, iyo dhibcaha Guud. Dhibcahee ayaa u dhow A1? Dhibcahee ayaa u dhow P2?
- *Barbardhig dhibcaha sannadkan kuwii dhibcihi ee sannadkii hore, haddii la heli karo.* Haddii u ilmahaagu qaatay ACCESS for ELLs ee Beddelka ah sannadkii hore, isbarbardhig dhibcaha hal sano ka ku xiga. Ma jirtaa wax faraq ah oo ku timid isaga/iyada dhibcahoo Heerka Xirfadaha? Ma jiraan wax faraq oo dhexeeya inta taagero isagu/iyadu ay ku helayaan Dhagaysiga iyo Akhriska?

Sidee dhibcaha imtixaanka loo isticmaalaa?

Dhibcaha laga helo ACCESS for ELLs Beddelka ah ayaa loo isticmaali karaa habab badan. Waalidiinta ayaa u isticmaali kara dhibcaha inay u doodaan ilmahooda, gaar haan markay la kulmayaan kooxda dugsiga u samaysa Barnaamijka Waxbarashada La gaar yeelay (IEP). Macalimiinta ayaa u isticmaala inay qorsheeyaan waxbaridda iyo qiimaynta. Degmooyinka dugsiga ayaa u isticmaala dhibcaha si ay u qiimeeyaan barnaamijyadooda taageerada luqadda, si ay ula socdaan horumarka ardayga koradhsiga Ingiriisiga, iyo si loo ogaado haddii ardayga u qalmo inuu ka baxo barnaamijka taageerada luqadda Ingiriisiga. Dhibcaha ayaa sidoo kale loo isticmaalaa qancinta shuruudaha la xisaabtanka dowladda federaalka iyo ta gobolkaba.

Su'aalaha la weydiinayo

Waxaan ku dhiirigelinaynaa qoysasku inay kala hadlaan dhibcaha macallinka(miinta) ilmahooda. Halkan waxaa ku xusan su'aalaha aad weyddiiso:

- Waa maxay dhibcaha uu isagu/iyadu u baahan yihiin inay ka baxaan barnaamijka taageerada luqadda Ingiriisiga?
- Ilmahaygu miyuu qaadan doonaa imtixaankan sannad kasta?
- Sidee dhibcaha loola wadaagaa macallimiintiisa/eeda?
- Waa maxay nooca taageerada luqadda Ingiriisiga aad siisaan ilmahayga?
- Maxaad jeceshihiin inaad ka ogaataan sida u ilmahaygu u isticmaalo luqadda guriga?
- Muxuu ilmahaygu u helay dhibcaha NA?
- Maxay ka dhigan tahay dhibcaha NA?

Haddii su'aalo aad ka qabto waxa ku saabsan dhibcaha ilmahaaga ee ACCESS for ELLs Beddelka ah, fadlan la xiriir dugsiga ilmahaaga.

ACCESS for ELLs Beddelka ah ayaa ka warbixiya siddeedda dhibcood ee soo socda:

- Dhagaysiga
- Hadalka
- Akhriska
- Qorista
- Luqad hadal
- Wax Qorka iyo Akhriiga
- Fahamka
- Guud Ahaan

Dhibcaha ayaa looga warbixiyaa dhibcaha Heerka Xirfadda iyo Dhibcaha Cabbirka.

Ereyada muhiimka ah ee loo baahan yahay in la ogaado

Bartayaasha luqadda Ingiriisiga ayaa ah arday u qalanta inay u helaan taageero dugsiga luqadda Ingiriisiga.

Horumarka luqadda ayaa ah nidaam qaadata wakhti. Ardayda ayaa ula socda nidaamkan heerar kala duwan.

Xirfadda luqadda waa qiyaasta meesha ay ardaydu ka joogaan nidaamka horumarka luqadda.